# MA RABTAA KA QAYBGALKA DARAASADDA CILMIYEED EE

***«Tilmaansiinta waalidiinta ee loogu talogalay qoysaska qaxootiga ah»*?**

Waa codsi ku socda adiga waalid ahaan oo ku saabsan ka qaybgalka daraasad cilmiyeed oo ujeedadeedu tahay u kuurgalka tilmaansiinta waalidiinta ee loogu talogalay qoysaska qaxootiga ah ee jooga Noorway. Qoraalkan waxa aad ka helaysaa macluumaad ku saabsan ujeedooyinka daraasadda iyo macnaha uu ka qaybgalkeedu kuu leeyahay adiga.

## UJEEDO

Ujeedada daraasaddu waxa ay tahay in la cabiro saamaynta ay leeyihiin barmaamijyada tilmaansiinta waalidka ee la dhaho Sannadaha Cajiibka Ah (De Utrolige Årene) iyo International Child Development Programme (ICDP) ee loogu talogalay qoysaska qaxootiga ah, iyo faa'idada uu leeyahay nidaam warcelinta loogu talogalay oo ay isticmaalaan hay'adaha ka shaqeeyaa arrimaha qaxootiga.

Barmaamijka hordhaca ah ee qaxootiga waxa ku jira qayb ah tilmaansiinta waalidiinta. Waxannu rabnaa in aannu daraasadan ku helno aqoon dheeraad oo ku saabsan waxtarka ay barmaamijyada tilmaansiinta waalidiinta, ee kala ah Sannadaha Cajiibka Ah iyo International Child Development Programme u leeyihiin waalidiinta iyo carruurta qaxootiga ah, iyo sida loo arko ka qaybgalka barmaamij ku saabsan tilmaansiinta waalidiinta. Ujeedada koowaad ee daraasadda ayaa ah in loo kuurgalo in barmaamijyada tilmaansiinta waalidiintu ay ka qaybqaadanayaan xoojinta wadadhaqanka wanaagsan, iyo yaraynta daryeel-xumada ka iman karta waalidiinta. Waxa kale oo iyana loo kuurgeli doonaa waayo-aragnimada ay heleen iyo fikradaha ay qabaan waalidiinta, carruurta iyo hogaamiyeyaasha kooxaha.

## YAA KA MASUUL AH DARAASADDA CILMIYEED?

Mashruucu waa iskaashi u dhexeeya Xarunta Aqoonta Gobolka ee Carruurta iyo Dhallinyarada Waqooyiga (RKBU Nord) ee UiT, RKBU badhtamaha Norway ee NTNU, RKBU galbeed ee NORCE, Xarunta Gobolka ee Carruurta iyo Dhallinyarada 'Caafimaadka Maskaxda Bariga iyo Koonfurta (RBUP bari iyo galbeed) iyo Spisskompetansemiljø taageerada waalidka iyo kahortaga (SKM).

Waxa kale oo aannu la kaashanaynaa Hay'adda Agaasinka Isdhexgalka iyo kala duwanaanshaha iyo xafiisyada qaxootiga ee ka tirsan maamullada degmooyinka ka qaybgalaya daraasadda

## WAA MAXAY SABABTA LAGUU WEYDIINAYO KA QAYBGALKA?

Waxa lagu weydiinayaa in aad ka qaybgashid daraasadda, sababtoo ah degmada aad degantahay ayaa ogolaatay in ay ka qaybgasho daraasadda cilmiyeed. Qoysaska haysta sharciga qaxootiga ee degmada degtay sagaalkii sano ee ugu dambeeyay waxaa lagu casuumay inay kaqeybqaataan. Isugeyn waxa aannu rabnaa ka qaybgalka 352 qoys oo haysta carruur ay da'doodu u dhaxayso 6 – 12 sanno.

## WAA MAXAY MACNAHA UU KA QAYBGALKU KUU LEEYAHAY?

Marka aad ka qaybgashid daraasadda waxa aad ka qaybgeli doontaa mid ka mid ah barmaamijyada tilmaansiinta waalidiinta oo Sannadaha Cajiibka Ah ama International Child Development Programme (ICDP). Dadka ka qaybgalaya darasadda waxa barmaamijyada loogu kala darayaa qaab bakhti-yaa-nasiib ah. Kuwo ka mid ah kooxaha tilmaansiinta walidiinta waxa lagu tijaabinayaa nidaam warcelin ah oo ku saabsan sida loo arko tilmaansiinta waalidiinta. Ka qaybgalayaasha ka tirsan kooxahan waxa laga codsan doonaa in ay toddobaad kasta ka jawaabaan su'aalo. Hogaamiyeyaasha kooxaha ayaa iyana loo ogolaan doonaa in ay arkaan jawaabahaas.

Ka qaybgalka daraasadda waxa ka mid ah in aad buuxisid foomam su'aalo oo u kuurgal ah. Waxannu rabnaa in aad noo ogolaatid in aannu la xidhiidhno macalinka ilmahaaga oo aan weydiisanayo ka jawaabista su'aalo ku saabsan habdhaqanka ilmahaaga marka uu joogo iskuulka.

Waxa kale oo daraasadda lagu waraysan doonaa qayb ka mid ah waalidiinta, carruurta iyo hogaamiyeyaasha kooxaha. Taas darteed waxannu kaa codsanaynaa in aad ogolaatid ka qaybgal waraysi. Waxa kale oo aannu kaa codsanaynaa in aad

ogolaatid in ilmahaagu ka qaybgalo waraysi, oo aannu markaana la xidhiidhi karno si aanu ilmahana u weydiisano ogolaanshihiisa oo afka/hadal ah.

Barmaamijka Sannadaha Cajiibka Ah waxa ku jirta qayb joogto ah, oo ah in fiidyow laga duubayo dhammaan kulannada kooxaha. Fiidyowyada loo duubay daraasadan waxa daawan doona cilmi-baadheyaasha, hogaamiyeyaasha kooxaha iyo tilmaansiiyehooda. Taas darteed waxannu kaa codsan doonaa in aad ka qaybgale ahaan ogolaatid in fiidyow laga duubo kulannada kooxaha. Hoos waxa aad ka akhrisan kartaa faahfaahinta waxyaalaha kala duwan ee aannu rabno in aad ogolaatid.

## TILMAANSIINTA WAALIDIINTA

Sannadaha Cajiibka Ah iyo International Child Development Programme (ICDP) waa koorasyo tilmaansiin ah oo la siiyo waalidiinta, oo markaa waalidiinta laga taageerayo la shaqaynta ilmahooda iyo u samaynta xuduudo toos ah, laakiin wanaagsan. Waalidku iyagoo koox-koox ah ayey ka shaqaynayaan horumarinta xidhiidhka ay la leeyihiin carruurtooda.

Sannadaha Cajiibka Ah waxa ay diiradda lagu saarayaa farsamooyin kala duwan oo waalidka ka caawinaya in ay wanaaga arkaan iyagoo inta badan ku mashquulaya habdhaqanka wanaagsan ee ilmaha isla markaana yaraynaya ku mashquulida habdhaqanka xun ee ilmaha. Ku mashquulida wanaagu waxa ay ka qaybqaadanaysaa dhiirigelinta xidhiidh wacan oo kalsooni leh oo u dhexeeya ehelka. Kooraska waxa loo dhiganayaa koox-koox halkaas oo ay waalidiinta iyo hogaamiyeyaasha kooxuhu ku kulmi doonaan oo isla eegi doonaan mawduucyo kala duwan oo ku salaysan xaaladaha iyo caqabada caadiga ah ee inta badan yimaada. Tusaalooyinka mawduucyada barmaamijya waxa ka mid ah ciyaarta iyo wakhtiga goonida u ah qofka, amaanta, wada-xalinta dhibaatooyinka, iyo ku mashquulka wanaagsan. Waa kooras lagu baranayo farsamooyin oo hogaamiyeyaasha kooxaha iyo waalidku ay si wadajir ah u falaqeeyaan oo uga doodayaan himilooyinka ay waalidku u samaysteen ilmahooda iyo qoyskooda. Kooraska waxa lagu daawan doonaa fiidyow goos-goos ah iyo layliyo farsamo ah oo markaa gundhig u noqonaya dood iyo falanqayn. Hogaamiyeyaasha kooxahu waxay ku hadlayaan af-noorweyji, laakiin waxa goobta joogi doona turjumaan wax turjumi doona. Waxa dhici karta in ay isla hal koox ay ka wada tirsanyihiin waalidiin ku hadla afaf kala duwan, taas darteedna ay joogaan dhowr turjumaan. Turjumaannada oo dhan waxa ku waajib ah sir qarinta.

International Child Development Programme (ICDP) waa barmaamij ku saabsan horumarinta caafimaadka iyo ka hortaga, oo ujeedadiisu tahay xoojinta daryeelka iyo korniinka carruurta iyo dhallinyarada. ICDP waxa lagu sameeyey Noorway, waxaana loogu talogalay waalidiinta iyo dadka kale ee ka masuul ah daryeelka carruurta. Barmaamijku waxa uu rabaa in uu taageero oo xoojiyo doorka daryeelka carruurta ee waalidiinta. oo isla markaana uu is waafajiyo qiyamka daryeelida carruurta ee ku salaysan caadooyinka waalidka iyo qiyamka ka dhex jira bulshada Noorway. ICDP waxa ay diirada saartaa qaabka ay waalidka iyo daryeelayaasha kale u arkaan ilmaha, waxaana la rabaa inuu ka qaybqaato dhiirigelinta in aragti iyo fikrad fiican laga haysto ilmaha. Barmaamijku waxa uu ka koobanyahay siddeed mawduuc oo khuseeya wadadhaqanka wacan, iyadoo la isticmaalayo agab caawimo ah oo fudud, si loo kordhiyo ogaanshaha muhiimada uu leeyahay wada noolaanshaha u dhexeeya waalidka iyo ilmaha. Siddeeda mawduuc waxa ay diiradda saarayaan dareennada, macnaha iyo korniinka garaadka, iyo kantaroolida. ICDP waxa ay meelaha qaar suuragelin kartaa kooxo lagu hadlayo afka hooyo ee ka qaybgalayaasha, tusaale ahaan haddii mid ka mid tilmaan-bixiyeyaashu ku hadlo afkooda ama iyadoo la isticmaalayo turjumaan. Toddobaad kasta waxa aad guriga ku tijaabinaysaa layliyo la xidhiidha mawduucyada ay kooxdiinu ka shaqaynayaan. Xilliga kooxdu kulmayso waxa jooga cid ilaalisa carruurta isla markaana waxa adiga iyo ilmahaba la siinaya cunto.

## NIDAAMKA WARCELINTA

Waxa daraasadda ka mid ah u kuurgalka in nidaam warcelin ah uu hogaamiyeyaasha kooxaha u fududayn karo in ay tilmaansiinta waalidka ka dhigaan mid waafaqsan baahiyaha waalidiinta. Su’aaluhu waxay ku saabsanyihiin sida aad u aragtid tilmaansiinta waalidiinta.

Waalidka ka tirsan kooxaha tijaabin doona nidaamka warcelinta ayaa toddobaad kasta ka jawaabi doono toddoba su’aalo iyagoo isticmaalaya barmaamij internet (app). Barmaamijkan waxa lagu soo degsan karaa dhammaan noocyada telefoonnada casriga ah. Jawaabaha waxa loo sii gudbin doonaa hogaamiyeyaasha kooxaha oo markaa arki kara horumarka iyo baahida taageero ee uu qof kastaa qabo ama kooxdu qabto. Isla markaana jawaabaha aad bixisid waxay qayb ka noqonayaan daraasaada.

## U KUURGAL LA ISTICMAALAYO FOOM SU'AALO

Haddii aad dooratid in aad ka qaybgashid daraasadda, waxa loo baahanyahay in aad buuxisid foom su'aalo ah afar jeer muddada ay daraasaddu socoto: ka hor bilaabida tilmaansiinta waalidka, xilliga ay socoto, isla marka la dhammeeyo iyo marka sannad ka soo wareego ka qaybgalka tilmaansiinta. Su'aaluhu waxa ay ku saabsanyihiin adiga, meesha aad ka soo jeedid, xaaladaada shaqo, caafimaadkaaga nafsadeed, qaabka aad u tarbiyadaysid ilmahaaga, qaabka aad u xalisid habdhaqanka xun ee ilmahaaga, iyo qaabka ilmahaagu u dhaqmo. Waxa dhici karta in su'aalaha qaarkood ay kugu abuuraan dareen adag.

Foomka su'aaluhu waa mid elektoroonig ah oo cinwaankiisa laguugu soo dirayo iimayl ama sms. Buuxinta foomku waxa ay qaadanaysaa 60 daqiiqo. Wakhtiga aad ku isticmaashid buuxinta darteed waxannu ku siin doonaa kaadhka hadyadaha oo ay ku jirto 200 karoon marka aad dhammaysid macluumaad-ururinta saddexaad (kadib marka la gebagabeeyo kulannada kooxaha) iyo ka afaraad (marka sannad ka soo wareego kulannada kooxaha). (Fiiro gaar ah: Hal macluumaad-ururin ah waxa ka mid noqon karaa dhowr foom oo su'aalo ah.) Isla markaana waxannu macalinka ilmaha ka codsan doonaa inuu buuxiyo foom su'aalo ah oo uu ku qoro macluumaad ku saabsan ilmahaaga. Su'aaluhu waxa ay ku saabsanyiihiin sida macalinku u arko habdhaqanka iyo aqoonta ilmahaaga.

## WARAYSI

Si loo ogaado khibradaha iyo fikradaha waalidiinta iyo carruurta, waxa aannu waraysan doonaa 40 waalidiin ah iyo 40 carruur ah. Waalidka waxa la weydiin doonaa khibradaha ay ka heleen ka qaybgalka barmaamijka tilmaansiinta waalidiinta iyo ahaanshaha qaxooti ku cusub Noorway. Carruurta waxa la weydiin doonaa sida ay u arkaan imaanshaha waddan cusub, waxa aad qoys ahaan wadajir u samaysaan iyo habka aad u tarbiyadaysaan carruurta. Waxa aad waraysiga hortii codsan kartaa in lagu tuso su'aalaha la weydiin rabo ilmahaaga. Waraysiyada waxa joogi doona turjumaan, waxaana lagu qaban doonaa goobo wacan oo ay ku kalsoonyihiin ilmaha iyo qofka weyn ba. Waraysiyada lala yeesho adiga iyo ilmaha waxa laga duubayaa cod (maqal).

Waalidiinta ama qof kale oo weyn tusaale ahaan macalinka ayaa joogi kara goobta lagu waraysanayo ilmaha, haddii la rabo sidaas.

## MUUQAALLADA FIIDYOWGA HA

Waxannu rabnaa in aannu aragno muuqaallada fiidyowga ah ee laga duubay kulannada tilmaansiinta waalidiinta si loo arko habka ay u wadajoogaan ka qaybgalayaasha kooxaha waalidiinta. Waxa kale oo aannu eegi doonaa macnaha ay leedahay in turjumaan la isticmaalo xilliga tilmaansiinta.

## KA QAYBGALKU MAAHA QASAB

Inkasta oo uu ka qaybgalka tilmaansiinta waalidiintu yahay qayb waajib ah oo ka mid barmaamijka hordhaca ah, haddana maaha qasab in aad ka qaybgashid daraasaddan cilmiyeed (oo ka kooban buuxinta foom su'aalo, waraysi iyo/ama fiidyow). Haddii aad ogolaatid in aad ka qaybgashid daraasaddan cilmiyeed waxa aad markasta dib uga laaban kartaa ogolaanshaha, adiga oo aan u baahnayn in aad sheegtid sababta.

Haddii aad ka baxdid daraasadda, waxa aad codsan kartaa in la tirtiro macluumaadka kugu saabsan, haddii aan maclumaadka lagu darin warbixin falanqayn ah ama lagu darin qoraallo cilmiyeed oo la soo saaray.

Wax dhibaato ah ma ku keenayso adiga, arrimahaaga Noorway ama xaaladaada dhaqaale haddii aanad rabin ka qaybgalka daraasadda ama aad marka hore ka qaybgashid, laakiin marka dambe ka baxdid. Haddii aad daraasadda ka baxdid ka hor intaan la dhammayn kooraska waalidiinta, wax saamayn ah ma kugu yeelanayso oo waad sii wadan kartaa kooraska. Haddii aad rabtid in aad ka laabatid ogolaanshaha ka qaybgalka daraasadda, la xidhiidh maamulaha daraasadda Joshua Patras, pirm@uit.no (hoos ka eeg faahfaahin)

## ILAALINTA MACLUUMAADKAAGA –KAYDINTA IYO ISTICMAALKA MACLUUMAADKAAGA

Macluumaadkaaga waxa loo isticmaalayaa keliya ujeedooyinka aannu ku sheegnay qoraalkan. Macluumaadka waxa loo maamulayaa qaab sir ah oo waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed. Cida keliya ee ka tirsan Xarun-cilmiyeedka goboleed ee carruurta iyo dhallinyarada ee gobollada Waqooyi ee arki karta macluumaadku waa kooxda daraasadda iyo kooxda taageerada daraasadaha cilmiyeed.

Waxa kale oo macluumaadkaaga arki kara cilmi-baadheyaasha, shaqaalaha daraasadda iyo kooxaha taageera ee ka tirsan xarumaha aanu la shaqayno.

Si aannu u hubsano in macluumaadka lagu hayo meel amaan ah, waxa aanu isticmaalaynaa Nettskjema (foom internet) oo noqonaysa maamulaha macluumaadka iyo TSD - Services for Sensitive Data oo ka tirsan Jaamacadda Oslo oo noqonaysa meesha lagu kaydinayo foomka su'aalaha iyo waraysiga. Magacaaga iyo macluumaadkaaga kale waxa lagu beddelayaa fure ku qoran liisas magacyo ah oo ka gooni ah macluumaadka kale, oo lagu kaydinayo liis is-waafajiye ah oo ay TSD u haynayso qaab sir ah.

Waraysiyada oo dhan waxa qoraal u beddelaya shirkadda Totaltekst As.

Dhammaan dadka maamulaya macluumaadkaaga, waxa waajib ku ah sir qarin isla markaana suurtagal ma aha in adiga ama ilmahaaga laga dhex garto natiijada daraasadda.

## MAXAA LAGU SAMAYNAYAA MACLUUMAADKAA MARKA LA DHAAMEEYO DARAASADDA?

Waxa la la qorsheeyey in daraasadda la soo gunaanado 31.12.2030. Liiska is-waafajiyaha ah, macluumaadka xidhiidhka iyo macluumaadka kale si toos ah ama si dadban loogu garan karo qofka waxa la tirtirayaa shan sanno kadib marka ay dhammaato daraasaddu, waa 31.12.2035. Taas oo macnaheedu yahay in wixii intaa ka dambeeya aanay suurtagal ahayn in la garto qofka macluumaadka leh isla markaana jawaabaha iyo macluumaadka ku saabsan adiga iyo qoyskaaga ma la fahmi karo in ay yihiin kuwiina

## XUQUUQDA ADIGA IYO ILMUHU LEEDIHIIN

Mar kasta oo ay suurtagal tahay in adiga iyo ilmahaaga lagu garto macluumaadka la hayo, waxa aad xaq u leedahay:

- in lagu tuso macluumaadka shakhsiyeed ee laga diiwaangeliyey adiga iyo ilmahaaga (waxa ku jira macluumaadka idinku saabsan ee laga helay macalimiinta),
- in la saxo khaladka ku jira macluumaadka ku saabsan adiga iyo ilmahaaga,
- in la tirtiro macluumaadka ku saabsan adiga iyo ilmahaaga,
- in lagu siiyo koobiga macluumaadkaaga shakhsiyeed (qaadashada macluumaadka), iyo
- In aad cabasho ku saabsan nidaamka maamullida macluumaadka adiga iyo ilmahaaga u dirtid kormeeraha ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed ama hay'adda ilaalinta maclumaadka shakhsiyeed.

## MAXAA NOO OGOLAADAY IN AANU MAAMULNO MACLUUMAADKA SHAKHSIYEED EE ADIGA IYO ILMAHAAGA?

Maamulka macluumaadka ku saabsan adiga iyo ilmaahaga waxa lagu saleeyey ogolaansha aad na siisay.

Guddi-goboleedka anshaxa daraasadaha cilmiyeed ee caafimaadka ayaa qiimaysay daraasadda, oo siisay ogolaansho hordhac ah oo lambarkiisu yahay 6852 (22/10/2019)

Jaamacadda Arktika ee Noorway (UiT) waxa ay shirkadda NSD – Norsk senter for forskningsdata AS ka codsatay in ay qiimayso nidaamka maamullida macluumaadyada shakhsiyeed ee daraasadda, waxaanay shirkaddu garatay in nidaamku waafaqsanyahay xeerarka ilaalinta macluumaadka shakhsiyeed.

## HALKEE KA HELI KARTAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

Haddii aad qabtid su'aallo ku saabsan daraasadda, ama aad rabtid inaad isticmaashid xuquuqdaada, la soo xidhiidh:

- Xarun-cilmiyeedka goboleed ee carruurta iyo dhallinyarada, gobollada Waqooyi (RKBU Nord) ku Joshua Patras på iimaylkiisa pirm@uit.no ama telefoon 776 46 265,
- Shirkadda NSD – Norsk senter for forskningsdata AS, iimaylka: personverntjenester@nsd.no ama telefoon: 55 58 21 17
- Haddii aad u baahantahay in aad xaaladaada kala hadashid cid aqoon u leh waxa aad la xidhiidhi kartaa goobaha caafimaadka ee ku dhow, dhakhtarkaaga ama la-taliyaha qaxootiga.

Salaan wacan

Masuulka daraasadda

Joshua Patras

# CADAYNTA OGOLAANSHAHA

Waxa aan helay oo fahmay macluumaad ku saabsan daraasadda «Tilmaansiinta waalidiinta ee qaxootiga iyo qoomiyaddaha laga tirada badanyahay» (PIRM), waanan helay fursad aan ku soo gudbiyo su'aalaha aan qabay.

Waan ogolahay in aan ka qaybgalo daraasadda PIRM iyadoo macnuhu yahay:

- ka jawaabista foom su'aalo ah
- in lagu duubo adiga oo ka qayb qaadanaya hagida waalidka
- in macluumaadkayga, iyo macluumaadka ilmahayga ku saabsan, la maamuli doono ilaa iyo dhammaadka daraasadda
- in jawaabahayga loo kaydin doono qaab sumad la'aan ah marka daraasaddu dhammaato

| | |
|---|---|
| | • Haa, waan ogolahay |
| | • Maya, ma ogoli |

Waan ogolahay in macalinka ilmahaygu uu ka jawaabo su'aalaha ku saabsan ilmahayga ee la xidhiidha daraasadda (haddii ilmuhu iskuul dhigto)

| | |
|---|---|
| | • Haa, waan ogolahay |
| | • Maya, ma ogoli |

Waan ogolahay in la i waraysto haddii loo baahdo

| | |
|---|---|
| | • Haa, waan ogolahay |
| | • Maya, ma ogoli |

Waan ogolahay in la waraysto ilmahayga haddii loo baahdo

| | |
|---|---|
| | • Haa, waan ogolahay |
| | • Maya, ma ogoli |

| Degmadee/xaafadee ayaad degantahay? Tusaale ahaan, Trondheim ama xaafadda Bydel Gamle Oslo |
|---|
| |
| Waa maxay magacaagu (magaca hore iyo ka dambe)? |
| |
| Taariikh iyo saxeex |
| |

FADLAN U GUDUB BOGGA XIGA

| Jinsigee tahay? | |
|---|---|
| | Haweeney |
| | Nin |
| Sannadkee ayaad dhalatay? | |
| | |
| Waa maxay telefoonkaaga gacantu (moobayl)? | |
| | |

**Waxa aad dooranaysaa ilmaha u weyn ee jira da' u dhaxaysa 6 iyo 12 sanno.skal.** Marka adiga laga areebo, ma qof kale oo degan Noorway ayaa haysta masuuliyadda waalidnimo ee ilmaha? (Tusaale ahaan waalidka kale?)

☐ Haa ☐ Maya

| Waa maxay qofkan magaciisu (magaca hore iyo magaca dambe?) | |
|---|---|
| | |
| Waa maxay jinsiga qofkani? | |
| | Haween |
| | Nin |
| Sannadkee dhashay qofkani? | |
| | |
| Miyuu qofkani sidoo kale ka qaybqaataa barnaamijka hagidda waalidka? Hadday sidaas tahay, waxaan sidoo kale jeclaan lahayn inaan ku martiqaadno qofkan inuu ka qaybqaato daraasadda PIRM | |
| | Haa, qofkani waa kaqeyb qaatаа barnaamijka hagidda waalidka |
| | Maya, qofkani kama qeyb qaato barnaamijka hagidda waalidka |

Waxannu hadda rabnaa inaad buuxisid macluumaadka xidhiidhka ee adiga, ilmahaaga iyo waalidka kale, adiga oo gelaya cinwaankan internetka ah:
**https://nettskjema.no/a/pirm-kontaktinfo-somali**

Marka adiga/idinku macluumaadka xidhiidhka ee qoyska ku buuxisaan baadhaha internetka, fadlan CADAYNTA OGOLAANSHAHA (bogga 5 iyo 6) u dir/dira:

***UiT Norges arktiske universitet***
***Postboks 6050 Langnes***
***Helsefak, RKBU NORD, PIRM prosjektet***
***9037 Tromsø***